Havelodden 4

7100 Vejle

tel.: 7582 1144

fakis.: 7582 7789

www.vejle-kirkegaarde.dk

Vejle Kirker og Kirkegårde (Vejle churches and cemeteries)

Vejle, 4th Diseembar 2012

## SHURUUCDA U DEGAN DHISMAHA goobta 2 XABAALAHA MUSLIMIINTA.

Muslim kasta, iyadoo aan loo eegeyn ictiqaadkiisa Muslimnimo, waa lagu aasi karaa goobta Muslimiinta ee Vejle NORDRE Kirkegård (qabuuraha waqooyiga Vejle).

Dhismayaasha qabuuraha ee cawska ku yaala waxaa iska leh dadka waaweyn/carruurta

1. Dhismayaal qabuuro oo hal ama in badan ayaa la iibsan karaa oo la hagaajin karaa ilaa 20 sanadood. (Dhismaha qabuuraha carruurtana waa 10 sano)

2. Dhawrid sanooyin badan ah iyo xafidaad iyo hagaajin khandaraas 20 sano ah waa in lala galaa Vejle Kirkegårde. (Dhismayaasha qabuuraha carruurta waa 10 sano)

3. Khandaraaska xafidaada iyo hagaajinta sanooyinka badan waxa uu daboolayaa xafidaada iyo hagaajinta dhismaha xabaalaha iyo qeyb ka mid ah goobta bulshada.

4. Sabarloogada dhismaha xawaalaha waxa loo soo saarayaa iibsadaha taasoo loo cusbooneysiin karo markii ay dheceyso waqtigii xafidaada. Sabarloogada dhismaha xabaalaha waa la cusbooneysiin karaa ugu yaraan 5 sano ugu badnaan 1 xili xafidaada ee ilaa 20 sano ah oo dadka waaweyn ah ama 10 sano oo ciyaalka ah.

5. Ogeysiinta aaska waa in la siiyaa Vejle Kirker og Kirkegårde ugu yaraan 2 maalmood oo shaqo ah aaska kahor.

6. Marxuunka/marxumada waa in kafan la geliyaa kahor aaska laguna aasaa iyadoo/isagoo kafanta ku jiro.

7. Dadida qabuuraha waxa sameynaya shaqaalaha xabaalaha. Qaraabada waxa ay ka qeyb qaadan karaan ku dadida kafanta iyo dhulka lagu aaso.

8. Aasku wuxuu dhacayaa 14.00.

9. Waxaa la heli karaa biyo halka laga soo gelayo xabaalaha.

Qaabeey dhismaha duugta:

1. 1 taallo/dhagaxdhiga qabuuraha waa la dhigi karaa dhismaha dqabuuraha Joog: 80 cm, Balac: 40 cm, Dherer: 10 cm. (Jooga: 50 cm, Balac: 30 cm, Dherer: 10 cm waa dhismaha aaska carruurta).

2. Ma jiraan wax looga baahan yahay oo la xiriira walxaha taalada laga sameynayo.

3. Dhagaxshub waxaa la dhigi karaa ama lagu qaabeyn karaa dhagax ama dhismo fuundi oo ku yaala dhismaha xabaalaha. Vejle Kirkegårde waxa ay daryeeshaa astaameynta dhismaha qabuuraha. Aasaaska dayrka iyo talaalka ubaxyada iyo kaymaha lama ogola.

4. Qurxinta iyo ubax jarida waa lagu sameyn karaa taalada horteeda.

Havelodden 4

7100 Vejle

tel.: 7582 1144

fakis.: 7582 7789

www.vejle-kirkegaarde.dk

# Vejle Kirker og Kirkegårde (Vejle churches and cemeteries)

5. Maamulka dhulka xabaalaha waxay ka siibi doonaan dhirta aan ku habbooneyn ama dhismaha ogeysiin la'aan.

Vejle 4ta Diseembar 2012

GUDDIGA XABAALAHA VEJLE.